



# HAGAHA CODEEYAHA DOORASHADA KA MAQAN

## Sida Horaansho Loogu Codeeyo Warqadda Codeeyaha Doorashada ka Maqan

Codeeyayaasha Minnesota waxa ay dooran karaan in si horraansho u codeeyaan iyada oo isticmaalay warqadda codeeyaha doorashada ka maqana – halka ay ka codeyn lahaayeen goobta doorashada Maalinka Doorashada.

Uma baahnid in si horraansho ah aad isku diiwaangeliso si aad ku codsatid warqadda codeeyaha doorashada ka maqan.

Warqadda codeeyaha doorashada ka maqan waxa ayaa diyaar ah in la isticmaalo 46 cisho kahor inta aannu dooraashada la qaban.

Sanadka 2014, warqadda codeeyaha doorashada ka maqan waxa ay diyaar ahaan doonaan:

- Juun 27 marka ay dhacayso Doorashada Hore ee Is-Reebreebka ee ku beegan Agoosto 12.
- Sateembar 19 marka ay dhacayso Doorashada Guud ee ku beegan Nofeembar 4.

Codeeyayaasha ciidamada qalabka sida ama waddaniyiinta Maraykanka dibadda ka deggan waxa ay warqadda codeeyaha doorashada ka maqana ah ku codsanayaan ayaga oo gala internetka [www.overseasvotefoundation.org](http://www.overseasvotefoundation.org).

## Boostada Ku Codee Warqadda Codeeyaha Doorashada Ka Maqan

Si aad boostada ku codeeyo warqadda codeeyaha doorashada ka maqan, buuxi soona dir arjiga warqadda codeynta ayadoo la galayo internetka [mnvotes.org](http://mnvotes.org). Ama inta arjiga ka daabacato internetka kaddibna aad buuxiso ku dir qaabka boostada, fakiska ama aad iimeyl ahaan ugu dirto xaafiska doorashada degmadaada.

- Sarkallada doorashada waxa ay warqadda codeeyaha doorashada ka maqan boostada kuugu soo dirayaan warqadaha sida ugu dhaqsiyo badan kaddib marka ay helaan arjigaaga.
- Qof markhaati ah waa in uu saxiixo baqashadda ay ku jirto warqaddaada codeeyaha doorashada ka maqan si lagu xaqiijiyo in warqaddaada doorashada meelaha loo baahna in la buuxiyo si qarsoodi aad ku buuxsatay. Markhaatiga waxa uu noqon karaa qof nootayo ah oo warqadaha rasmiga ah ka sharciyeeyaa gobol kale ee kasta ama codeeye ka diiwaangalan Minnesota.
- Haddii aadan ku diiwaangalnayn in aad codeeyo, waxaa warqadaha la soo raacinayaa arjiga diiwaangalinta codeeyaha. Waxaa shardi ah in aad markhaatiga tustid marka aad isdiiwaangelineysid dukumiinti aqoonsi ah ee caddeynaya degganaanshaha. Booqo [mnvotes.org](http://mnvotes.org) si aad ku ogaatid aqoonsiyada kala duwan ee caddeynaya degganaanshaha.
- Waxaa shardi ah in aad warqadda doorashada soo celisid maalinka ay Doorashada Guud ku beegantahay ama kahor.

Siyaabooyinka diritaanka:

- Nafsi ahaantada aad u geysid xafiiska markii horeba ku soo diray warqadda codeeyaha doorashada ka maqan 5ta galabnimo maalinka ay doorashada dhacayso.
- Boostada ugu dir baqshadda ku jirta baqshadda warqadaha laguugu soo diray ama qaab baqshadaha lagu diro. Warqadda codeynta waxaa shardi ah in la helo Maalinka Doorashada ay ku beegantahay ama kahor.
- Qofkale warqaddaada codeynta ha u celiyo 3da galabnimo kahor Maalinka Doorashada ay ku beegantahay. Qofkaan lama oggola in uu meesha geeyo wax ka badan saddex warqadood ee doorashada.
- Lama oggola in aad nafsi ahaantada aad warqaddaada codeeyaha doorashada ka maqan geysid rugta doorashada maalinka Doorashada Guud ay dhacayso.

## Nafsi Ahaantaada Ku Codeey Codeeyaha Doorashada Ka Maqan

Waxa aad codsan kartaa, heli kartaa iyo ku coddhiiban kartaa warqadda codeeyaha doorashada ka maqan adiga oo hal booqasho ku gaara xafiiska doorashada ee degmadaada.

Waxa aad nafsi ahaan ugu codeyn kartaa codeeyaha doorashada ka maqan laga bilaabo inta aannu 46 cisho ee ka horreeysa doorashada, xilliyadaan soo socda:

- Isniinta – Jimcaha maalmaaha saacadaha caadiga ah ee la shaqeeyo.
- Sabtiga ugu dambeeya ee ka horreeya maalinka Doorashada Guud (10ka subaxnimo -3da galabnimo).
- Maalinka ka horreeya Maalinka Doorashada illaa 5ta galabnimo.

Haddii aadan isdiiwaangelin in aad codeeyo, waxaa shardi ah in aad buuxiso foomka isdiiwaangelinta codeeyaha iyo aad caddeynta degganaanshaha tustid xafiiska doorashada. Waxaa jira aqoonsiyo kala duwan ee caddeynaya degganaanshaha ee ku qoran [mnvotes.org](http://mnvotes.org).

## Isticmaalka Qaabka Diritaanka Wakiilka Ku Codey Codeeyaha Doorashada Ka Maqan

Marka ay xaalado qaas ah jiraan, waxa aad codsan kartaa in aad qof aad aqoon u leedahay in uu booskaaga soo qaado iyo ku soo celiyo warqadda codeeyaha doorashada ka maqan. Fursaddaan waxaa la yiraahdaa ‘qaabka diritaanka wakiilka.’

Si aad nidaamkaan u isticmaashid waxaa shardi ah:

- In aad tahay qof deggan guryaha waayeelka lagu hayo, rug nafsadda lala tacaalo, rug dadka lagu daaweeyo, guri koox aad ka tirsantahay la dejiyey ama hoyiga dumarka sida ba’an lagula dhaqmay.
- Ama, tahay qof isbitaal jiifa ee aan awood u lahayn in uu taago rugta doorashada sababo caafimaadka ama naafonimada la xariira.

Wakiillada waxaa shardi ah in ay yihiin dad ugu yaraan jira 18 sano, ay kula leyihiin xiriir hore ee taxana aha kula laha iyo nafsi ahaantooda aysan ahayn musharax. Wakiillada waxa ay caawin karaan illaa saddex codeeye doorashadiiba.

Wakiilkaaga waxa aad u dhiibtaa arjiga warqadda doorashada codeeyaha dooraashada ka maqan oo la buxiiyay iyo foomka ‘codsiga diritaanka wakiilka ee warqadda codeeyaha doorashada ka maqan’ – labada foomka waxa aad ka heleysaa ayadoo la galo [mnvotes.org](http://mnvotes.org). Wakiilka waxaa shardi ku ah in uu foomanka geeyo xafiiska codeynta deegaanka si uu ku helo warqadda doorashada.

- Wakiilkaaga waxa uu warqadda doorashada soo qaadi karaa waqti kasta laga bilaabo toddobada cisho ee ka horreeya doorashada illaa 2da duhurnimo ee Maalinka Doorashada.
- Wakiilka ama qof kale ee codeeyaha magacaabay waxaa shardi ku ah in uu warqadda doorashada ee la buuxiyay ku soo celiyo waqti ku began 3da galabnimo ee Maalinka Doorashada.
- Codeeyaha waxa ee warqadda codeeyaha doorashada ka maqan uu ku soo celin karaa boostada ama diritaanka qaaska ah; warqadda doorashada waa in ay saraakiisha doorashada ku helaan Maalinka Doorashada ama kahor.

## La Soco Warqaddaada Codeeyaha Doorashada Ka Maqan

La soco halka ay ku dambeeyo warqaddaada codeeyaha doorashada ka maqan adiga oo isticmaalaya aaladaha la socoshada warqadda codeeyaha doorashada ka maqan ee laga galayo [mnvotes.org](http://mnvotes.org). Haddii ay dhibaato soo gaarto warqaddaada doorashada, saraakiisha doorashada ayaa warqad baddal ah kuu soo dirayaa.